

## FAQs (Su'aalaha Inta Badan la Waydiiyo) Sharciga Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore

### 1. Sidee iyo goorma ayaa diidmada kama dambaysta ah loo soo gudbin doonaa?

Dhammaan diidmada kama dambaysta ah ee Barnaamijka Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore waxa lagu soo gudbin doonaa email ahaan laga bilaabo Oktoobar. 5.

### 2. Maxay yihiin sababaha la iigu soo diray u diidmada lacagsiinta shaqaalaha safka hore?

Arjiyadu waxaa loo siiyey diidmo kama dambeys ah mid ama dhowr ka mid ah sababahan soo socda.

- Codsaduhu muuna soo dirin rafcaan si wakhtigiisa ku habboonaa ama ma soo dhammaystirin dhammaan foomamka rafcaanka ee lagama maarmaanka ah si uu uga jawaabo diidmadii hore ee loo soo sheegay Agoosto. 16, 2022. Haddii codsaduhu uu helo diidmada u qalmitaanka oo uuna rafcaan ka qaadanin go'aanka isagoo si guul leh ku soo diray foomamka rafcaanka ee la xiriira muddada 15-ka maalmood ee rafcaanka, diidmada waxaa loo tixgeliyey inay tahay kama dambays.
- Marka loo eego xogta ay soo gudbiyeen codsadaha iyo xogta Waaxda Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalaha, codsaduhu wuxuu dhaafay heerka caymiska shaqo la'aanta ee lagu dejiyay sharciga.
- Marka loo eego xogta ay soo gudbiyeen codsadaha iyo xogta Waaxda Dakhligu, codsadaha dakhligiisa guud ee la isku hagaajiyay ayaa dhaafsan xadka lagu dejiyey sharciga.
- Lama xaqiijin karo u qalmitaanka shaqo ee codsadaha. Tan waxay u badan tahay inay sabab u yihiin mid ka mid ah sababaha soo socda:
  - Codsaduhu wuxuu ahaa qandaraasle madax-bannaan, milkiile ganacsi ama mulkiilaha keligii ah. Sharcigu wuxuu u baahanyahay codsaduhu inuu yahay shaqaale ku jira xiriirka loo-shaqeeyaha iyo shaqaalaha si uu ugu qalmo.
  - Codsaduhu kamuuna shaqaynin Minnesota. Sharcigu wuxuu u baahan yahay in codsaduhu uu ka shaqeeyey Minnesota ugu yaraan 120 saacadood si uu ugu qalmo.
  - Codsaduhu ma shaqayn ugu yaraan 120 saacadood.
- Codsadaha waxa loo arkay in uu ku laba ceshi yahay Tani waxay ka dhigan tahay in wax ka badan hal arji oo wata isla lambarka Sooshal Sakuuratiga ama Lambarka Aqoonsiga Cashuur bixiyaha la soo diray. Hal lacag oo kaliya ayaa la siin doonaa codsadaha u qalma.
- Aqoonsiga codsadaha lama xaqiijin karo

Eeg [shuruudaha u qalmitaanka ee lagu aasaasay sharciga](#).

### 3. Goorma ayaa heli doonaa go'aanka ku saabsan racfaankayga?

Rafcaannada la soo gudbiyay waa la fuliyey oo la falanqeeyay. Go'aannada kama dambaysta ah ayaa lagula socodsiiyay codsadyaasha email ahaan. Sida lagu xusay sharciga lacag siinta shaqaalaha safka hore, go'aankani waa kama dambays.

**4. Yaan soo wici karaa si aan u helo macluumaad kale oo ku saabsan arjigayga, diidmada ama racfaanka?**

Dhammaan go'aamada racfaanku waa kama dambays.